

# MACLUUMAADKA MARKA UU QOF KUGU EDEYO KIIS KU SAABSAN XEERKA AMARKA IILAALINTA RABSHADAH GURIGA

## Waa inaad raacdaa amarka haddii kale waa lagu xidhi karaa waxaana lagugu oogi karaa dembi

Raac amarka xitaa hadii

- uu dacwooduhu leeyahay waa caadi in la iska dhega tiro amarka oo uu rabo inuu kula xidhiidho,
- uu dacwooduhu been sheegay si uu u helo amarka,
- uu garsooraha ku khaldamay amarka, ama
- aad dhibane u tahay rabshad qoys.

Haddii aad rabto inaad xerayso amarkaaga ilaalinta, akhri Tilmaamaha: Sida loo Helo Amarka Ilaalinta Rabshadaha Guriga (foomka [DV-150](#)), oo laga heli karo [ak-courts.info/dv150so](#).

Macluumaad dheeraad ah: [ak-courts.info/pub23](#)

Haddii aad qabtid su'aalo ama haddii aad u baahan tahay turjumaan, weydiiso maxkamadda degaankaaga caawimaad.

## Waa maxay xeerka ilaalinta rabshadaha qoyska?

Amarka/Xeerka ilaalinta waxa saxeexa xaakim oo ku amraya inaad samayo ama aanad samayn waxyaalaha qaarkood. Tusaale ahaan, amarada ilaalintu waxay badanaa u sheegaan qof inuu ka fogaado qof kale oo uusan la xiriirin.

Codsashada amarka ilaalinta la mid ma aha in aad dembi u sheegto booliska. Amarka ilaalintu waa kiisaska madaniga ah.

Waxa kale oo laga yaabaa inaad haysato kiis dembi oo la xidhiidha isla dhacdada uu amarka ilaalintu ku salaysan yahay. Haddii kiiskaaga dembigu leeyahay amar "xidhiidh la'aan", waa inaad raacdaa amarka dembiga iyo amarka ilaalinta ee madaniga ah labadaba. Haddii mid ka mid ah amarda uu ka xaddidan yahay kan kale, raac nidaamka amarka xaddidan. **Ha la xidhiidhin qofka kale haddii aanay jirin amarro kale.**

## Waa maxay shuruudaha aan u baahanahay inaan ogaado?

**Dacwoodaha.** Qofka maxkamadda ka codsadaya amarka ilaalinta ah. Waalidka ama mas'uulka sharciga ah ayaa xarayn kara codsiga isagoo ka wakiil ah ilmo yar. Mas'uulka sharciga ah ayaa xarayn kara codsiga isagoo ka wakiil ah qof weyn oo aan karti lahayn.

**Jawaab bixiye.** Qofka uu codsadaha codsadaya in laga ilaaliyo. Haddii laguugu edeeyay amarka ilaalinta, markaas waxaad tahay jawaab bixiye.

**Codsi.** Dukumeentiga uu dacwooduhu u gudbiyay maxkamadda si uu u codsado amar ilaalin ah. Waxuu sheegayaan sababta uu dacwooduhu u rumaysan yahay inuu u baahan yahay amarka ilaalinta.

## **Waa maxay noocyada kala duwan ee amarada/xeerarka ilaalinta rabshadaha qoyska?**

**Amarka ilaalinta muddada-gaab** (sidoo kale loo yaqaan amarka "ex parte") wuxuu socdaa ilaa 20 maalmood. Garsooruhu wuxuu ku kordhin karaa 20 maalmood oo kale haddii (1) aadan helin nuqulka amarka 20-ka maalmood ee ugu horreeya, Sharci fulinta ay u baahan yihiin waqtii dheeraad ah si ay ku siiyaan; ama (2) aad ogolaatay inaad kordhiso; ama (3) garsooruhu helo sabab wanaagsan oo lagu kordhiyo ka dib markuu idin dhegysto adiga iyo dacwoodaha labadinaba. Garsooruhu waxa uu amarka ku saleynayaa waxa uu dacwooduhu ku qoray codsiga iyo waxa uu dacwooduhu ka marag kacay wakhtiga dhegeysiga, haddii uu jiro dhegaysi.

**Amarka ilaalinta muddada-dheer** wuxuu socon karaa ilaa hal sano. Garsooruhu wuxuu kaliya bixin karaa amar waqtii-dheer ah kadib dhegeysiga maxkamadda. Waa inaad heshaa ugu yaraan 10 maalmood oo ogaysiis ah kahor dhegeysigan oo aad fursad u leedahay inaad ka hadasho dhegeysiga si aad ugu sheegto garsoorka dhinacaaga. Haddii aadan aadin dhageysiga, garsooruhu wuxuu bixin karaa amarka isagoon ku maqlin. Sharci fulinta ayaa mas'uul ka ah inay ku ogeysiyaan dhageysiga.

**Amarka ilaalinta muddada-gaab** iyo tan **muddada-dheer labadaba**. Haddii dacwooduhu uu codsado labada nooc ee amarada, garsoorka ayaa dib u eegi doona codsiga isla maalinta la xareeyay oo go'aamin doona in la bixinayo amarka muddada-gaab ah iyo in kale. Haddii garsooruhu bixiyo amarka muddada-gaab ah, maxkamaddu waxay jadwal u samayn doontaa dhegaysi 2-3 toddobaad gudahood si ay go'aan uga gaadho in la bixinayo amarka muddada-dheer ah iyo in kale (eeg cutubka sare). Haddii garsooruhu diido amarka muddada-gaab, maxkamadda waxey jadwaleyn kartaa ama iska deyn kartaa dhageysi waqtii dheer ah.

**FIIRO GAAR AH:** Waxa kale oo jira nooc amar ah oo loo yaqaan **Amarka Ilaalinta ee Degdegga ah** kaas oo soconaya 72 saacadood. Waxa xerayn kara oo kaliya sharci fulinta waxuuna ku salaysan yahay waxa uu dacwooduhu u sheego sharci fulinta. Codsadaha iyo sharci fulinta midkoodna ma kordhin karo amarka degdegga ah in ka badan 72 saacadood. Uma baahnid inaad sameyso wax ka jawaabaya amarka degdega ah oo aan ahayn inaad la socoto. Dalabka noocaan ah waa naadir si dheeraad ahna loogama hadlin foomkan.

## **Muxuu u baahan yahay codsaduhu in uu caddeeyo si uu u helo amarka ilaalinta?**

Waxa jira laba walxood oo ah "rabshad qoys" oo uu codsaduhu u baahan yahay inuu caddeeyo:

1. Codsadaha wuxuu kula leeyahay nooc xiriir ah. Cilaqaadkan waxaa sharci ahaan loogu yeeraa "xubnaha qoyska", laakiin qasab maaha inaad wada noolaataan si aad ugu qalanto. Bogga 6aad ee foomkan waxa ku yaal liiska xidhiihada saxda ah.
2. Wuxaa dambi ka gashay dacwad-oogaha. Dembiyada qaarkood (ee sharci ahaan loo yaqaano "dambiyada rabshadaha qoyska") ayaa u qalma amarka ilaalinta rabshadaha qoyska. Dacwad-oogaha uma baahna inuu magacaabo dembiga. Garsooraha ayaa go'aamin doona in dambi dhacay iyo in kale iyadoo lagu salaynayo waxa uu dacwooduhu sheegay inay dhaceen. Dhammaadka foomkan waxaa jira liiska dembiyada rabshadaha qoyska.

## **Sideen ku ogaan karaa inuu qof igu heysto amarka/xeerka ilaalinta muddada-gaabban ah ama uu cadsanaayo amarka ilaalinta muddada-dheer?**

Haddii ay maxkamaddu bixiso amarka ilaalinta oo muddo-gaabban ah, sharci fulinta (booliska deegaanka, ciidamada gobolka, VPSO, iwm.) waa in ay ku siiyaan nuqulka amarka oo ay kuu sharaxaan. Tan waxaa loo yaqaan "adeegga." Akhri oo raac wax walba sida ay u kala horreeyaan. Haddii aadan samayn, waa lagu xidhi karaa oo lagugu soo oogi karaa dembi.

Haddii ay maxkamaddu jadwaleysa dhageysiga amarka ilaalinta muddada-dheer, sharci fulinta waa in ay ku siiso:

- nuql ka mid ah cadsiga uu soo gudbiyay cadsaduhu. Tani waxay kaa caawin doontaa inaad fahamto waxa uu dacwooduhu sheegay inay dhaceen, si aad ugu diyaargarowdo dhageysiga muddada dheer ah.
- ogaysiis leh taariikhda, wakhtiga, iyo goobta dhagaysiga maxkamada mustaqbal. Mararka qaarkood ogaysiiskani wuxuu noqon doonaa qayb ka mid ah amarka ilaalinta, mararka qaarkoodna waxay ku qornaan doontaa dukumeenti gaar ah. Dhagaysigu waa fursadaada si aad ugu sheegto garsoorka sheekada dhinacaaga. Haddi aad hesho ogaysiiska oo aadan ka soo qayb galin dhagaysiga, garsooraha ayaa go'aamin doona in lagu siinayo amarka ilaalinta iyo in kale adiga oo aan dhegaysan. Haddii aad hesho ogeysiiska wax ka yar 10 maalmood ka hor dhegaysiga, waxaad weydiisan kartaa maxkamadda inay dib u dhigto dhageysiga si ay kuu siiso waqtii dheeraad ah oo aad ku diyaargarowdo.

Haddii aad ku ogaatay amarka ilaalinta ama dhageysiga maxkamadda si kale oo aan ahayn adega sharci fulinta, la xiriir sharci fulinta deegaankaaga si aad u hesho nuql qoraal ah oo amarka ah. Wuxaad sidoo kale la xiriiri kartaa maxkamadda amarka bixisay wixii macluumaad dheeraad ah. Xitaa haddii aan weli laguu soo dirin amarka, waa fikrad wanaagsan inaad iska ilaaliso inaad la xiriirto dambi-oogaha.

## **Ma la ii ciqaabi karaa dembile ahaan haddu qof igu ogo kiis xeerka ilaalinta ah?**

Kiis xeerka ilaalinta madaniga ah maaha kiis dembi. Garsooraha kiiskaaga amarka ilaalinta kuuma diri karo xabsiga ama kuma amri karo inaad bixiso ganaax. Si kastaba ha ahaatee, waxaa lagugu ciqaabi karaa dembi hadii

- ay booliska ama xeer ilaaliyuuhu kaa xereeyaan kiis dambiyeed la mid ah dhacdadii la xiriirtay kiiski xeerka/amarka ilaalinta, waxaana lagugu xukumay dembigaas. Wuxaad heli doontaa ogeysiis kasta oo dambiga ku saabsan. Wuxaad kula tartami kartaa si la mid ah dambiyada kale.
- aadan raacin amarka ilaalinta. Waxaa lagugu soo oogi karaa dembi loo yaqaan "ku xadgudubka amarka ilaalinta." Haddii lagugu helo dembi, dembigani wuxuu leeyahay ugu badnaan xadhig ah hal sano iyo ugu badnaan \$25,000 oo ganax ah.

**Muhiim:** Waxaa lagugu soo oogi karaa inaad jabisay amarka ilaalinta muddada-gaabban, xittaa haddii dacwooduhu uusan cadeynin in dhacdadu ka dhacday dhageysiga amarka ilaalinta muddada-dheer. Tusaale ahaan, maxkamaddu waxay siinaysaa dacwoodaha amar waqtii gaaban ah oo kaa dhan ah. Wuxaad jabisay amarka waxaana lagugu soo oogay inaad jabisay amarka ilaalinta. Wuxaad tagtaa dhageysiga amarka ilaalinta muddada-dheer oo u sheeg garsoorka dhinacaaga sheekada. Garsooruuhu muu bixinin amarka muddada-dheer. Weli waxaa lagugu heli karaa dembiga inaad jabisay amarka muddada gaaban markii uu dhaqan galay.

## **Maxaa dhacaya haddii aan carruur leeyahay?**

**Haddii aad caruur u leedahay dacwoodaha.** Amarka/xeerka ilaalinta ayaa laga yaabaa inuu bixyo amarro la xiriira jadwalka haynta, booqasho la kormeerayo ama isdhaafsiga, ama masruufka ilmaha.

Haddii aad leedahay xannaanayn gaar ah, furriin, kala tagid, ama kiis kale oo madani ah oo ku lug leh carruurta, amarada ku jira kiiskaaga amarka ilaalinta ayaa laga yaabaa inay ka duwanaadaan amarrada kiiskaaga kale. Waa inaad raacdha amarada ku jira kiiska amarka ilaalinta. Waxay jabiyaan amar kasta oo eey ku jiran xanaaneynta, furriinka, kala tagidada, ama kiisaska kale ee madaniga ah.

Haddii garsooruuhu bixyo amarka ilaalinta muddada-dheer, xaakinka gacanta ku hayo, furriinka, kala tagidada, ama kiis kale oo madani ah ayaa laga yaabaa inuu u baahdo booqasho la ilaalinayo oo carruurtaada ah. Garsooraha ayaa kuu sheegi doona sida aad ku hesho booqasho aan la ilaalin. Caadiyan waxay u baahan tahay ka qaybqaadashada barnaamij.

**Haddii aad caruur u leedahay qof kale.** Sida uu dhigayo sharciga Alaska, haddii uu jiro amar ilaolineed oo wakhti dheer ah oo lagugu soo oogay, waxaa laga yaabaa in aanan laguu ogolaanin inaad hayso ama aad la yeelato booqasho aan la ilaalinayn carruurtaada, xataa haddii dacwooduhu aanu ahayn waalid ama masuulka carruurtaas. Haddii ay taasi dhacdo, xaakimka kiiska kale ee ku lug leh carruurtaada ayaa kuu sharxi doona waxa ay tahay inaad sameyso si aad u joojiso xannibaadda. Caadiyan waxay u baahan tahay ka qaybqaadashada barnaamij.

## **Maxaa ku dhacaya alaabtayda ama waxyaalaha aan la wadaago codsadaha?**

Amarka ilaalinta ayaa laga yaabaa inuu si ku meel gaar ah u siiyo dacwooduhu guriga aad la wadaagto, xayawaanka rabaayada ah, gaadiidka, iyo alaabta kale ee gaarka ah. Amarka ilaalintu wuxuu leeyahay qayb "Qoraal Kaalmo ah". Qaybtan, garsooruuhu wuxuu amri karaa fulinta sharciga

- ka caawi codsadaha inuu helo shayada ku qoran nidaamka ilaalinta. Waxaa lagaa rabaa inaad u wareejiso codsadaha ilaa amarka ilaalintu uu dhamaanayo ama la bedelayo. Muhiim ma ahan cidda leh.
- waxay kaa caawiyaan inaad alaabtaada ka hesho guriga la wadaago. Way fiicantahay inaad la xidhiidho sharci fulinta si aad u hesho caawimo inta lagu jiro maalinta, marka saraakiishu inta badan aanay mashquulin. Wuxaa heli doontaa kaliya 15 daqiqiyo, markaa ka fikir waxyaalaha ugu muhiimsan ee aad u baahan tahay ka hor intaadan tegin. Haddii codsadaha uu joogo, ha la hadlin iyaga. Haddii aad su'aalo qabto, weydii sarkaalka. Sarkaalku kuma ogolaan doono inaad qaadato wax uu dacwooduhu ku diido inaad qaadato.

Haddii garsooruuhu aanu hore ugu amrin sharci fulinta inay kaa caawiyaan inaad alaabtaada hesho (ama aad u baahan tahay inaad mar labaad dib u laabato), waxaad waydiisan kartaa garsooraha inuu tan ku daro amarka. Hoos ka eeg su'aasha ku saabsan sida loo beddelo amarka.

## **Sideen ugu sharixi karaa maxkamada inaan diidanahay kiiska amarka ilaalinta?**

Haddii uu jiro amar ilaalin ah oo muddo gaaban ah (20-maalmoor) oo lagugu oogay, waxaad haysataa laba ikhtiyar:

1. Weydiiso inaad beddesho ama joojiso amarka ilaalinta muddada-gaaban. Fiiri su'aasha xigta.
2. Haddii uu jiro jadwal dhegeysi waqtidheer, raac shuruudaha amarka ilaalinta muddada-gaaban ilaa dhageysiga, ka dibna u sheeg garsoorka dhinacaaga dhegeysiga muddada dheer.

Haddii uu jiro amar muddo dheer (hal sano ah) oo adiga kaa soo horjeeda, waxaad codsan kartaa inaad beddesho ama joojiso amarka ilaalinta muddada-dheer. Fiiri su'aasha xigta.

## **Sideen uga codsadaa maxkamadda inay beddesho ama joojiso kiiska amarka ilaalinta?**

Kadib markuu garsooruhu bixiyo amarka ilaalinta, waxaad waydiisan kartaa garsooraha

- beddel (wax ka beddel) amarka. Tani waxay ka dhigan tahay in amarku sii jiri doono, laakiin waxaad jeelaan lahayd inaad beddesho qaar ka mid ah shuruudaha. Tusaale ahaan, waxaad rabtaa jadwal booqasho oo ka duwan kii hore inaad la yeelato carruurta ama waxaad u baahan tahay xiriir xaddidan oo aad la yeelato dacwoodaha si aad ugala hadasho arrimaha dhaqaalaha. Iisticmaal Codsiga si aad wax ka badalka Amarka Ilaalinta (foomka [DV-131](#) ama [DV-131M](#)).
- jooji (so af jar) amarka. Tani waxay ka dhigan tahay in amarku gebi ahaanba meesha ka bixi doono. Haddii dacwooduhu aanu ku raacsanayn tan, waa inaad caddaysaa in wax muhiim ahi is beddeleen tan iyo markii uu garsooruhu amarka bixiyey. Maxkamaddu dib uma dhageysan doonto dhageysiga mar kale. Iisticmaal Codsiga Burburinta Amarka Ilaalinta (foomka [DV-133](#) ama [DV-133M](#)).

Foomamka waxaa laga heli karaa nuqul warqad ah xafiiska karraaniga maxkamadda, waxaana laga heli karaa online at [ak-courts.info/dvforms](http://ak-courts.info/dvforms).

Haddii aad codsato inaad beddesho ama joojiso amarka muddada-gaaban, maxkamaddu waxay caadiyan dhegaysi ku qabanaysaa 72 saacadood gudahood. Haddii aad codsato inaad beddesho ama joojiso amarka muddada-dheer, maxkamaddu waxay caadiyan dhegaysi ku qabanaysaa 2-4 toddobaad gudahood. Waa inaad tagtaa dhageysiga haddii kale codsigaaga waa la diidi doonaa.

Hayso xogtaada xidhiidhka (gaar ahaan lambarada telefoonada iyo ciwaanada iimaylka) si ay maxkamadu kuu siiso ogaysiiska dhagaysiga. Haddii aad rabto in macluumaadkaaga xidhiidhka laga ilaaliyo dacwoodaha, weyddii karraaniga maxkamadda sida tan loo sameeyo.

**Muhiim:** Sii wad inaad raacdoo amarka ilaalinta ilaa garsooruhu wax ka beddelo ama qoraal ku joojiyo. Haddii amarku is beddelo ama kuu dhammaado kiiska amarka ilaalinta madaniga ah, ma beddelayo amarada kiis kasta oo dembi ah oo la xidhiidha isla dhacdada. Sidoo kale, haddii kiiska dembiga la joojiyo ama la badalo, ma beddeleyso kiiska xeerka ilaalinta ee madaniga ah. Xataa hadii hal dalab uu isbedelo ama dhamaado, waa inaad wali raacdaa amarka kale. **Ha la xidhiidhin qofka kale haddii aanay jirin amarro kale.**

## **Ma jiraan sharcayo federaali ah oo ay tahay inaan ogaado?**

Marka loo eego 18 USC § 922(g)(8), lagama yaabo in laguu ogolaado inaad lahaato ama haysato hub haddii waligaa lagugu oogay amarka ilaalinta rabshadaha qoyska ee mudada dheer. Sharcigaan waa laga yaabaa in lagu dabaqo ama lagu dabaqin kiiskaaga, iyadoo ku xiran nooca xiriirkha aad la leedahay dacwoodaha iyo natijjooyinka gaarka ah ee garsooruhu ku sameeyay amarka ilaalinta. Sharcigani ma khuseeyo amarrada ilaalinta degdegga ah ama muddada gaaban.

## DAMBIYADA KU LUG LEH RABSHADAH QOYSKA

### **Si aay ugu qalanto dambiga rabshadaha qoyska:**

- Waa in dambi la galaa ama la isku dayo; iyo
- Dembiga waa in uu qof qoyska ka mid ahi ka galay xubin kale oo qoyska ka tirsan; iyo
- Dembigu waa inuu noqdaa mid ka mid ah dembiyada ku taxan sharciga Alaska, ama ku xad-gudub sharci la mid ah magaalo ama gobol kale.

### **Qeexida "xubnaha qoyska" ee hoos yimaada sharciyada Alaska ee rabshadaha qoyska:**

(1) Dadka waaweyn ama carruurta aan qaan-gaarir ee ka mid ah kuwan midkood ama ka badan:

- lamaanaha hadda ama hore
- wada nool ama hore u wada noolaa
- ku dhex jira shukaansi ama xiriir galmo (ama hore u ahaan jiray)
- waxay iskala xidhiidhaan dhiig ama korsasho ilaa "darajada afraad ee kalgacalyka"
- ay qaraabo yihiin ama hore u xidhiidhin guur
- wada dhalaan ilmo

(2) Carruurta yaryar ee qof kasta oo ka mid ah cilaqaadka qaybta (1).

### **Liiska dambiyada u qalma amarka ilaalininta rabshadaha qoyska:**

**Weerarka** waa marka uu qof jidh ahaan u dhaawaco qof kale, ama marka uu qof ugu hanjabo inuu jidh ahaan u dhaawaco qof kale oo isla markiiba fulin karo hanjabaadda. Haddii ay jirto hanjabaad, waxaa laga yaabaa inaad awoodo inaad hesho amar ilaalin ah xitaa haddii uusan la dacweyaha ku dhaawacin jir ahaan.

**Gubidda ama Dembigu dayacaadda Gubashada** waa marka uu qofku waxyeeleeyo hanti qof kale isagoo kicinaya dab ama qarax. Sidoo kale waa dembi dabeed haddi aad ku waxyeeleyso hantidaada dab ama qarax haddii ay qof kale gelisay halis dhaawac jireed oo halis ah.

**Tuuggunimo** waa marka qof si sharci darro ah u soo galo ama u joogo dhisme qorsheynaya inuu dembi ka galo dhismaha.

**Dembi-xumada** waa marka qof si ula kac ah u waxyeeleeyo qof kale hantidiisa. Fal-dembiyeedka weli wuu dhici karaa haddii qofku si wadajir ah u leeyahay hantida la dhaawacay.

**Gef-dambiyeedku** waa marka qof si sharci darro ah u soo galo ama u joogo dhulka, guri, ama gaadhiga.

**Arxan-darrada lagula kaco xayawaanka** waa marka qof si bareer ah u dilo ama u dhaawaco neef xayawaan ah, ulajeedka ah inuu cabsi geliyo, u hanjabo, ama argaggixyo qof kale.

**Faragelinta xannaanaynta** waa marka xubin qoyska ka mid ah uu qaado oo uu hayo ilmo iyada oo aan wax sharci ah loo haysan, qofkuna wuxuu damacsan yahay inuu ka ilaaliyo ilmaha masuulka sharciga ah muddo dheer. Tusaale waxaa ah waalidkii ubadka kaxeeya si uu ubadka uga fogeeyo waalidka kale muddo dheer, iyada oo aan lahayn sharci ah. Ma aha faragelin mas'uuliyadeed marka waalidku ku guuldareysto inuu soo celiyo ubadka waqtigii lagu heshiiyey.

**Baadda iyo qasbiddu** waa dembiyada loo yaqaan "blackmail." Waxay ku lug leeyihii qof geysta ama u hanjabaya dhaawac jidheed ama noocyoo kale oo waxyeelo ah si ay u helaan hanti qof kale, ama inay ka dhigaan qof kale wax aanu doonayn inuu sameeyo. Tusaale ahaan waa qof ku hanjabaya inuu internetka ku dhiigo wax ceeb ah ilaa aad qofka siiso lacag.

**Dhibaatayntu** waa marka qof, ulajeekisu u yahaay inuu dhibaateeyo ama ka cadhaysiyo qof kale:

- Taleefan la so waco oo la goyniin, si qofka kale aanu u wici karin ama u qabaniin telefon kala; ama
- Wuxuu sameeyaa wicitaano taleefan oo soo noqnoqda saacado aan ku haboonen; ama
- sameeyo wicitaan ama isgaarsiin elegtaroonig ah oo qarsoodi ah ama fisqi ah, ama khatar keenaya xaga dhaawac jireed ama xiriir galmo; ama
- daabacaan ama qaybiyaan sawiro, sawiro, ama muuqalo muujinaya xubinta taranka ee qofka kale, futada, ama naaska dhedig, ama tusaya qofka kale fal galmo ah.

**Afdubku** waa marka uu qofku qabto qof kale oo aan raali ka ahayn qofkaas. Caadiyan, waxa kale oo ay la macno tahay in uu qofku qorsheynayo in uu jidh ahaan ama galmo u geysto qofka kale, waxa uu abuuraa khatar weyn oo ah in qofka kale uu si xun u dhaawacmo, ama uu qariyo qofka kale si ay u jirto khatar weyn oo ah in qofka kale aanu lee heliin.

**Khatarta aan ka fiirsasho lahayn** waa marka facilada qofku ay abuuraan khatar sare oo dhaawac jidheed oo halis ah qof kale. Tusaale ahaan marka aad wadadda ku sii waddo oo uu rakaabku qabsado isteerinka, isaga oo isku dayaya in uu xoog kaa saaro waddada oo ay u badan tahay in aad gasho shil baabuur oo halis ah.

**Dhaca** waa marka uu qofku isticmaalo xoog, ama uu ku hanjabo in uu xoog isticmaalo, si uu lacag ama hanti qof kale uga qaato. Lacgta ama hantidu waa inay ahaato mid jidh ahaan saaran ama aad ugu dhow qofka kale marka xoogga la isticmaalo ama hanjabaadda la sameeyo.

**Dambiyada gal moodka** waxaa ka mid ah dhammaan noocyada faraxumaynta gal mada, xadgudubka gal moodka ee ilmo aan qaan-gaar, galmo-wadaaga, iyo qaawinta anshax darrada ah. Xadgudub galmo wuu dhici karaa xitaa haddii labada dhinac is qabaan. Dembiyada ku lug leh samaynta filimada qawaan ee carruurta aan qaan-gaar ayaa kamid ah, laakiin dembiyada kale ee la xidhiidha filimada qawaan guud ahaan maaha.

**Dhaadhidda** waa marka qof uu si is daba joog ah ula xiriilo qof kale isaga oo aan oggolaansho ka haysan qofkaas, oo xiriiryadu waxay si macquul ah uga dhigi karaan qofka kale inuu ka baqo dhaawac jireed ama dhimasho.

**Hanjabaadda argagixisanimadu** waa marka qof uu sheegto in ay jirto xaalad naf-halis ah oo qofkale gelinaysa cabsi dhaawac jidheed. Tusaale waxaa ah in uu kugu soo waco taleefanka oo uu kuugu hanjabo in uu ku toogan doono marka aad guriga ka baxdo. Sidoo kale waa dambi haddii khatartu ay keento daad laga daadgureya dhismo ama dhibaato la mid ah koox dad ah.

**Ku xadgudubka amarka ilaalinta** waa marka qofku sameeyo shay qofka laga mamnuucay inuu sameeyo rabshad guri, dabagal, ama amarka ilaalinta faraxumaynta.